



Maxaanu kuu qaban karnaa?

DUKH waa deeq talobixineed oo loogu talo galay dadka naafada ah, ehelkooda iyo dadka kale ee xidhiidhkooda ah. Waxa aanu ka talobixinaa deeqaha ay helaan naafadu iyo maaraynta kiisaska khuseeya. Waxa aad DUKH adeegsan kartaa, haddii aad:

- ku guuldarraysato in aad talobixin ka hesho dawladda hoose aad deggan tahay
- qasanto ama garan waydo gees aad u kacdo oo aad u baahato in lagu caawiyo si aad hore ugu socoto
- dhib kaala kulanto sidii aad wadahadal ula yeelan lahayd kiismaareeyahaaga
- la yaabto sida dawladda hoose u maarayso arrimahaaga
- la kulanto isku tuurtuur ay kugu sameeyeen dhawr xafiis oo kala duwani
- ka xun tahay go'aan laga gaadhay kiiskaaga, oo shaki kaa galo fursadaha racfaan qaadashada

Talobixinta DUKH waa bilaash.

DUKH ma awooddo:

- in ay qiyaasto ama jarto baaxadda caawimada
- in la igmado ama kuu noqoto qareen
- in ay ka talobixiso naafanimo gaar ah
- in ay go'aan ka gaadho ama wax ka bedesho kiiskaaga

Marka aad na soo wacdo

Marka aad na soo wacdo, waxa aad makaaba la hadlaysaa qof ah shaqaalaha maamulka. Si kooban ayuu u dhegaysanayaa kiiskaaga, markaas ayuu qiimaynayaa, in uu hoos yimaadd waxyaabaha aanu ka shaqaynno. Markaas ayuu kiiska u gudbinayaa mid ka mid ah talobixiyayaashayada.

Lataliyeaasha ayaa xoog u sii dhex gelaya kiiskaaga oo qiimaynaya, sida ugu fiican ee aanu kuu caawin karno. Waxa ay noqon kartaa, in lataliyuhu markiiba kaaga jawaabo su'aashaada. Waxa kale oo ay noqon kartaa, in arrintaadu u baahato baadhitaan dheeraad ah. Haddii ay sidan noqoto, mar danbe ayaa lagu la soo hadlayaa.

Haddii aad email noo soo dirto

Waxa kale oo aad nagula soo xidhiidhi kartaa email. Emailka ka soo dir boggayaga internetka. Si nabadgelyo ah ayuu noo soo gaadhayaa emailka halkaas laga soo diraa, waxana aann ka helaynaa wararka aanu u baahan nahay oo dhan.

Tarjubaan

Waxa suurtagal noo ah, in aanu kuu keeno tarjubaan, haddii aad u baahan tahay. Qarashka tarjubaankana anaga ayaa bixinayna.

DUKH

Naga la soo xidhiidh

DUKH

Jupitervej 1
6000 Kolding

mail@dukh.dk

sikkermail@dukh.dk

Faahfaahin dheeraad ah ka akhri: www.dukh.dk

Tlf.: 76 30 19 30

Fax: 75 54 26 69

Xilliyada tilifoonka

Isniin 9.00 - 15.00

Salaasa 9.00 - 15.00

Arbaca 9.00 - 13.00 *

Khamiis 9.00 - 17.00

Jimce 9.00 - 15.00

* Arbacada way xidhan tahay talobixintu – inkastoo tilifoonku u furan yahay arrimaha kale 9-13.



www.dukh.dk

Boggayaga internetka waxa aad:

- Ka akhriyi kartaa faahfaahin dheeraad ah oo la xidhiidha DUKH
- ka haysaa aqoon la xidhiidha sharciyada naafada
- ka haysaa jawaab cad oo la xidhiidha arrimaha, qaar ka mid ah talooyinka badan ee aanu ku bixino netka.
- ka diri kartaa email xafidan, haddii aad rabto talobixin
- ka akhriyi kartaa goobaha laga jeedinayo khudbadaha iyo muxaadaroyinka
- iska diiwaangelin kartaa wararkayaga emailka ah

